

Qaybta Cusub ee Mudnaanta Dhibaataada iyo Hanaanka Wareejinta



Yaa dalban/buuxsan kara barnaamijka wareejinta mudnaanta Dhibaataada [Crisis priority transfer]?

Codsashada wareejinta waa inuu soo dalbadaa qofka kireystaha (saxixaha guriga).

Sideen u dalban karaa barnaamijka wareejinta mudnaanta Dhibaataada?

Wakhtigii aad doonto ayaad soo dalban kartaa barnaamijka wareejinta mudnaanta Dhibaataada, xafiiska Guryaha Jaaliyadda Toronto. Uma baahnid in aad soo gudbisno arji ama dukumentiyoo goorta aad wareejinta aad soo codsanayso. Khabiirka Xog Ururiyaha ayaa kaa caabin doona inuu arjigaaga kula buuxiyo oo dukumintiyadana loo baahan yahayna kula ururiya. Sawirka bogga xiga wuxuu kuu sharaxayaa hanaanka loo maro.

Yaa u qalma barnaamijka wareejinta mudnaanta Dhibaataada?

Si aad ugu qalanto, adiga ama xubin kale oo qoyska ka tirsan waa inuu noqdaa lixdan qaybood mid ka mid ah:

1. Dhibane ay qabsatay dhib wayn oo ay ku qabsatay xaafadda halka aad ku nooshahay inta lagu jiray lixdii bilood ee la soo dhaafay
2. Adigu aad markhaati ka ahayd dhib wayn oo ka dhacay xaafaddaada inta lagu jiray lixdii bilood ee la soo dhaafay
3. Qof kale oo xubin aqalka qoyska ka ah oo markhaati ka ah dhib wayn oo ka dhacay xaafadda halka aad ku nooshahay inta lagu jiray lixdii bilood ee la soo dhaafay
4. Dhibane ay haysato dhibaato harawsasho/cabsigelin inta lagu jira muddadii seddexdii bilood ee la soo dhaafay
5. Markhaati ay haysato dhibaato harawsasho/cabsigelin inta lagu jira muddadii seddexdii bilood ee la soo dhaafay
6. Shaqsi curyaan/naafo ah ama qaba xaalad dhowrsan sida uu qabo Xeerka Xuquuqda Aadanaha ee Gobolka Ontario goorta waajibaadka waxlooga qaban karo kaliya ay tahay in qofka la wareejiyo

Sidee ayay Guryaha Jaaliyadda Toronto ku ogaan kartaa haddii anigu aan xaq u leeyahay?

Khabiirka Xog Ururiyaha ayaa adiga kaala shaqayn doona inuu kaa caawiyo in aad u heli la'hayd dukumentiyada aad ugu baahan yahay baliiska, xirfadlayaasha caafimaadka ama qof kasta oo kale ee looga baahdo.

Sidoo ayaan ku helaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xaaladda arjigayga?

Goorta aad dalbato barnaamijka wareejinta mudnaanta Dhibaataada, waxaa lagu heli doonaa lambarka EasyTrac. Khabiirka Xog Ururiyaha ayaa laba maalmood gudahooda kula soo xiriiri doona. Khabiirka Xog Ururiyaha wuxuu kaala hadli doonaa tallaabooyinka xiga oo waxay ku siin doonaan halka laga soo xiriiro si markaa aad ula soo xiriirto codsigaaga wareejinta.

Dalbashada Barnaamijka Wareejinta Mudnaanta Dhibaataada

